STATE OF WISCONSIN
DEPARTMENT OF CHILDREN AND FAMILIES
Division of Family and Economic Security

HESHIISKA KA QAYB-GALKA KAALMADA LACAGTA CADDAANKA AH EE QAXOOTIGA

Refugee Cash Assistance (RCA) Participation Agreement

Macluumaadka gaarka ah eed halkan ku bixiso ayaa dad kale lala wadaagi karaa ujeeddada keliya ee laga leeyahayna waa xagga hawlaha maamuulka ee barnaamijka Kaalmada Lacagta caddaanka ah ee Qaxootiga (Refugee Cash Assistance) (RCA) iyo barnaamijyada kale ee la xiriira. Fiiri lifaaqa la yiraa Addendum to Application/Registration (DWSW-2378-1) si aad war dheeraad ah u hesho.

Waan garanayaa in Kaalmada Lacagta caddaanka ah ee Qaxootigu (RCA) ay tahay caawimo ku meel-gaar ah inta aad shaqo raadsanayo. Adeegyada Shaqo-siinta Qaxootiga (Refugee Employment Services) ayaa iga caawin kara in aan helo oon haysto shaqo si aan u buuxiyo waajibaadka i saaran. Haddii aan qaato RCA, waxaan oggolaanaya waxa soo socda:

XEERASHA SHAQADA

- Himiladayda ayaa ah in aan helo oon haysto shaqo aan qaban karo. Haddii aan shaqayn karo, waxaan raadsan doonaa oon oggolaan doonaa shaqo. Haddii aanan hadda shaqayn karin, waxaan ka qayb-qaadan doonaa adeegyada iga caawin doona in aan kordhisto isku-filnaasho. Waxaa dhici karta in aanan u qalmin RCA haddii aan diido in aan bilaabo ama ka tago shaqo anigoon sabab macquul ah haysan.

- Waan garanayaa inay waajib igu tahay in aan ka qayb-qaato dhammaan falalka laga wada-hadlay oo la iiga diray Qorshahayga Shaqaalaysiinta (Employability Plan) (EP). Anigoo qaata RCA, waa in aan oggolaado shaqo ku meel-gaar ah, joogto ah, si buuxda loo qabanayo ama mid xilli-xilli ah waana in aan ka qayb-galo hawlaha barnaamijka ee la ii diro.

- La ii diri maayo shaqo ama tababar aanan samayn karayn. Waa in aan isla-markaaba FEP-gayga u sheego haddii aanan samayn karayn falalka la iiga diray EP-gayga sababtoo ah mid caafimaad, in aan maxkamad tagayo ama sabab kaleba. Haddii aan qabo xaalad cudur oo saamaynaysa kartidayda shaqaysiga, waxaa dhici karta in la iga codsado in aan soo maro baaritaan caafimaad ama qiimayn nooc kale si loo go'aamiyo in aan u baahan ahay adeegyo ama habayn gaar ah. Haddii aan ka cawdo in shaqada ama tababarka la ii diray ay saamayn doonaan caafimaadka jirkayga ama maskaxdayda, waxaa la iiga baahan doonaa in aan soo diro caddayn qoran oo uu xaaladda ka sameeyo daaweeye la oggolyahay, si loo awoodo in adeegyada loogu toosiyo baahidayda.

- Ballamo la ii diro ayaan kula kulmi doonaa Qorsheeye Dhaqaale iyo Shaqo (Financial and Employment Planner) (FEP) iyo maamule arrin Shaqo-siin Qaxooti (Refugee Employment). Waan og ahay in la ii diri doono falal diyaar-garoow ah oo ku habboon kartidayda iyo waajibaadkayga, sida ka muuqata Qorshaha Shaqaalaysiinta ee kan la socda.

- Haddii aanan shaqayn karayn maxaa yeelay waxaan ka weyn ahay 64 jir, ama waan naafaysan ahay, waxaan dalban doonaa Dakhliga Badbaadada Dheeraadka ah (Supplemental Security Income) waxaanan soo mari doonaa qiimayn kastoo xagga caafimaadka si loo caddeeyo naafonimadaada.

- Waan og ahay in hawlaha RCA ee la ii diro ay:
  - ◊ ku eekaan doonaan dhammaan sharciyada iyo xeerasha federaaliga ah ama goboleed ee habboon;
  - ◊ ku eekaan doonaan dhammaan heerarka caafimaadka iyo amniga ee federaaliga ah, goboleed iyo deegaaneed oo kala-sooc la';
  - ◊ iiga baahan doonin in aan isaga noqdo xuquuq shaqaale ahaan ama ururreed; iyo
  - ◊ in aanan beddeli doonin shaqaale ku jira shaqo-ka fariisi, meel shaqo xirasho, ama muran kaloo shaqada la xiriira oo daacad ah.

WAAJIBAADKA

- Waa in aan xafido dhammaan ballamahaan la leeyahay hawlwadeenkayga RCA iyo khabiirkayga shaqada oo aan dhammaystiro falalka kalee la ii diray ama aan sheego sababta aanan u dhammayn karayn.

- Waan ogahay haddii aan diido in aan ka qayb-qaato la iman waayana sabab macquul ah, in ay hay'adda W-2 ku dhaqaaqi doonto hawl ganaaxid oo ay ku xannibayso ama jarayso lacagahayga RCA.

- I Macluumaadka loo baahdo caddayn ayaan ka bixin doonaa muddo todoba (7) maalmood ah gudahood ka dib marka la i weydiiyo. Waxaan ka warbixin doonaa isbeddellada dakhliga, maalka, iyo hab-dhismeedka qooyska muddo 10 maalmood ah gudaheed ka dib marka isbeddelku yimaaddo. Waa in aan weliba FEP-gayga ka wargeliyaa isbeddel kastoo soo gaara cinwaankayga boosta ama telefoonkayga. Waa in aan weliba FEP-gayga ka wargeliyaa dhibaato kastoo iga haysata helista waraaqaha si loo yarayn karo dhibaatada is-gaarsiinta. (Haddii aad qaadato kaalmooyin ama cayr kale, sidoo kale isbeddel kaste ka wargeli geli Khabiirkaaga Taageerada Dhaqaale (Economic Support Specialist)).

- Bixinta macluumaad qaldan, ama qarinta macluumaad ku saabsan cidda aan ahay ama cinwaankayga si aan u helo ama u sii qaato kaalmooyin badan, waan og ahay in ay ii keeni karto dambi oogid. Waan ogahay in ay waajib igu tahay in aan celsho cayr ama kaalmo kastoon ku helo macluumaad qaldan oo dhiibay.

- Haddii aan si qalad ah la ii siiyo lacag RCA, waa in aan celsho.

XUDUUDDA WAQTIGA

- Waan ogahay in lacagaha RCA la heli karo uun ugu badnaan 8 bilood ka dib taariikhda soo-geliddayda Maraykanka. Hase yeeshee, qaxootigu intooda ugu badan muddo siddeed bilood ka yar ayay shaqo ku helaan kuna joojiyaan ku tiirsanaantooda RCA-da

XAQA RAFCAANKA

Xaq baad u leedahay inaad ka rafcaan qaadato go'aanka hay'adda. Haddaad u malaynayso in uu go'aanka hay'addu qaldan yahay, soo wac hawlwadeenkaaga si aad macne uga hesho. Sidoo kale, waxaad codsan kartaa Dhegeysi Xaq ah (Fair Hearing) haddii aad u malaynayso in uu falka la qabtay qaldan yahay. Sida loo codsado Dhegeysi Xaq ah waxaa kuu sheegi kara hawlwadeenkaaga, ama codsi qoran oo wata magacaaga, cinwaankaaga, lambarkaaga telefoonka, lambarkaaga badbaadada bulshada (social security number) iyo sababta Rafcaanka ayaad u soo diri kartaa Division of Hearings and Appeals (Qaybta Dhegeysiyada iyo Rafcaannada), PO Box 7875, Madison WI 53707-7875. Haddii aad codsato Dhegeysi Xaq ah ka hor taariikhda uu hirgalayo fal la qabanayo, cayrta ama kaalmooyinka waa la sii wadi doonaa ilaa iyo inta go'aan kama dambays ah la gaarayo. Kaalmooyinku sii socon maayaan oo dhaafi maayaan waqtiga u-qalmista ee 8 bilood ah. Haddii Dhegeysiga Xaqa ahi uu xaqiijiyo in aadan u qalmin kaalmooyinka, waxaa khasab kugu noqon doonta in aad soo celiso kaalmooyinka qalad ahaan laguu siiyey. Waa in aad codsiga Dhegeysi Xaq ah soo dirtaa muddo 45 cisho ah gudaheed ka dib taariikhda ogaysiinta haddii kale Baaraha Dhegeysigu (Hearing Examiner) kuu tixgelin maayo codsiga.

XUQUUQDA DADWEYNAHA

Waxaad xaq u leedahay turjume uusan wax kharash ahi kaaga bixin. Sharciyada xuquuqda dadweynaha ayaa dhigaya in aanan qof u qalma loo diidin ka qayb-galka, helidda cayrta ama kaalmooyinka, ama haddii kaleba loola iman kala-sooc nooc kasteba ah oo ku salaysan jinsiyadda, midabka, asalka dhalashada, diinta, lab ama dheddig midda qofku yahay, naafonimada ama da'da. Taas waxaa dheer, codsadeyaasha iyo dadka qaata FoodShare ayay mamnuuc tahay in loola yimaaddo kala-sooc ku salaysan fikradahooda siyaasadeed. Haddii aad nafo qabto, waxaad xaq u leedahay turjume xagga fara-ka hadalka, shayo qaab kale u samaysan ama habayn noocyo kale ah. Xaq baad u leedahay in aad dalbato turjume haddii aadan ku hadlin Ingiriisiga. Xaq baad u leedahay in aad geli kartid shakhsiyan meelaha lagu bixiyo adeegyada.

Haddii ay ila tahay in aan ahay qof naafo qaba oo aan naafonimdayda awgeed u baahan doono caawimo waqtiga aan ka qayb-galayo barnaamijka RCA, waxaana kala hadli doonaa FEP-gayga.

Saxiixa Codsada/Ka qayb-galaha	Taariikhda Saxiixa Codsadaha/Ka qayb-galaha
Saxiixa Mudakirka ah Xubin Urureedka Kalee RCA	Taariikhda Saxiixa Mudakirka Kale

RETAIN COMPLETED FORM IN CASE RECORD